



Qaabab la garan karo

Fadlan kala xiriir xafiiska Guddoomiyaha si aad u hesho macluumaad ku qoran qaab la garan karo.

Sidee cabashada loo sameeyaa?

Waxaad cabasho u soo gudbin kartaa Guddoomiyaha ayadoo ah:

- Qoraal
- Taleefan
- Fakis
- Ka soo gudbinta foomka cabashada adoo maraya website-ka ah
- Ama habab kale kuwaas oo ku habboon duruufahaaga

Wixii macluumaad dheeraad ah

Disability Services Commissioner
Level 30, 570 Bourke Street
Melbourne Vic 3000

Wac

Cabashooyinka
1800 677 342 (Lacag La'aan)
Wax-weydiinta Guud
1300 728 187 (Wicitaanka caadiga ah)

TTY 1300 726 563

Fakiska 03 8608 5765

Website www.odsc.vic.gov.au

Waa
OK
in la cawdaa

It's **OK** to Complain - **Somali**



Ma u baahan tahay caawimaadda qaarkeed si aad u xalliso cabasho laga keenay adeegga iinta ama bixiyaha adeegga?

Guddoomiyaha Adeegyada linta wuxuu ku siin karaa adeeg qarsoodi ah si uu kuu caawiyo.

Waxaa jira waxtarro badan oo ay leedahay in laga sameeyo cabasho bixiyaha adeegga iinta iyo in la gaaro xal sida ugu dhakhsaha badan.

Ayadoo qayb ka ah Xeerka linta 2006, bixiyeyaasha adeegga iinta waa inay leeyihiin habka maaraynta cabashooyinka sidaas darteed waa wax fiican in la warsado inay leeyihiin habkaas si loo caawiyo in la gaaro habka ugu fiican oo lagu xallin karo cabashadaada.

Habka cabashooyinka wuxuu horseedi karaa adeegyo wacan oo ay helaan dadka qaba iimaha ee Victoria sidaas darteed wadajir u keenista xalalku waa wax u fiican qof kasta.

Kumaa samayn kara cabasho?

Qof kasta ayaa Guddoomiyaha u soo gudbin kara cabasho ku saabsan adeegyada iinta. Kuwaasna waxaa ka mid ah dadka qaba iimaha, qoysaskooda iyo daryeelayaashooda, shaqaalaha ka shaqeeya adeegyada iinta iyo qof kasta oo jecel inuu sameeyo cabasho.

Maxay cabashadu ku saabsanaan kartaa?

Cabasho ayaa loo soo gudbin karaa Kumaasaariyaha ku saabsan:

- bixinta adeegga iinta
- habka bixiyaha adeegga iinta uu u maareeyey cabasho ku saabsan adeegga iinta.

Muxuu sameeyaa Guddoomiyaha Adeegyada linta?

Guddoomiyaha waxaa loo abuuray inuu la shaqeeyo dadka qaba iimaha iyo bixiyeyaasha adeegga iinta si loo xalliyo cabashooyinka.

Guddoomiyahu wuxuu ku dhiirigeliyaa uuna gacan ka gaystaa xallinta cabashooyinka siyaabo kala duwan oo ay ka mid tahay wadahalada aan rasmiga ahayn, hababka dhexdhexaadinta, baarista rasmiga ah.

Guddoomiyahu waxaa la bilaabay 1 da Luuliyo 2007 ayadoo la raacayo Xeerka linta ee 2006 si loo hagaajiyo adeegyada ay helaan dadka qaba iimaha ee Victoria.

Guddoomiyahu waa ka madaxbanaan yahay xukuumadda, Wasaaradda Adeegyada Insaanka, iyo bixiyeyaasha adeegga.

